

# Goobta Nadiifinta Alaabaadka Cuntada Dawn



Dhismaha Wayn ee Alaabaadka Cuntada Dawn

## Faalooyinka la aqbalay:

Maay 22 – Julaay 5, 2023

## Gudi faalooyinka:

**Onlayn:** [www.bit.ly/Ecology-DawnFoodProducts-Comments](http://www.bit.ly/Ecology-DawnFoodProducts-Comments)

### Boosta:

David Butler, Site Manager  
 PO Box 330316

Shoreline, WA 98133-9716

Taleefanka: (206) 518-3513

limeel: [David.Butler@ecy.wa.gov](mailto:David.Butler@ecy.wa.gov)

## Akhriska waraaqaha:

[www.bit.ly/Ecology-DawnFoodProducts](http://www.bit.ly/Ecology-DawnFoodProducts)

Seattle Public Library

South Park Branch

8604 8th Ave S.

Seattle, WA 98108

Taleefanka: (206) 615-1688

## Mcluumaadka goobta:

Aqoonsiga Goobta Xarunta: 3505

Aqoonsiga Nadiifinta Goobta:

16678

## Macluumaadka Wacyi Gelinta Shacabka:

Augie Nuszer,

Khabiirka Wacyi Gelinta

[LDW@ecy.wa.gov](mailto:LDW@ecy.wa.gov)

Taleefanka: (425) 533-5537

## Waraaquhu waxay diyaar u yihiin inay shacabku akhriyaan oo ay ka faaloodaan

Bay'adu waxay ku heshiiyeen sharci loo yaqaan Amarka Lagula Heshiiyay Bridge Point Seattle 130 LLC (Bridge Point), Cida Masuuliyada Yeelanaysa Mustaqbalka (Potentially Liable Person, PLP), goobta Nadiifinta Alaabaadka Cuntada Dawn (Site) oo ku taala 6901 Fox Avenue South in Seattle. Amarka Lagu Heshiiyay waxa uu u baahan yahay LPL inay ka jawaabto wasakhda goobta. Waxa aad ka doonaynaa fikirkaaga waraaqaha soo socda:

- **Amarka Lagu Heshiiyay:** waraaqo sharci ah oo u baahan in Brigde Point inay baadho xaaladaha deegaanka, dhamaystirto Baadhitaanka Xalka ah (RI), Daraasada Macquuliyada (FS), iyo qabyo qoraalka Qorshaha Talaabada Nadiifinta (dCAP).
- **Qorshaha Ka Qayb Galka Shacabka:** waxa uu sharaxayaa sida Bay'adu ay ugu sheegi doonto bulshada hawlaha goobta iyo qaababka lagaga qayb geli karo.

## Kulanka guriga furan iyo muujinta

Bay'adu waxay qaban doontaa guri furan iyo kadibna kulan foolka-fool/onleyn ah oo lagu muujinayo oo uu joogo turjubaan luuqadaha Isbaanish, Jayniis, Fiitnaamiis, Khmer, Somali, iyo Amharic.

### Arbaco, Maay 31, 2023

- **Guri Furan** 5:30 galabnimo.
- **Bandhiga:** 6:30 galabnimo.
- **Kulanka Foolka-foolka ah:** South Seattle College, Georgetown Campus, 6737 Corson Ave S, Seattle, WA
  - Turjubaan ayaa lagu heleyaa taleefanka iyo sameecado. Bay'ada waxay haysaa taleefano xadidan oo ay dadku ergisan karaan.
- **Kulanka Onleynka ah:** Onleyn isku duwaan geli oo ku biir Zoom-ka [www.bit.ly/Ecology-DawnFoodProducts](http://www.bit.ly/Ecology-DawnFoodProducts)
  - Turjubaan ayaa la heli karaan kulanka Zoom-ka.

**Wixii macluumaad dheeraad ah ee luuqada ah, ka eeg boga 4 →**

# Barnaamijka Nadiifinta Wasakhda

## Taariikhda Goobta

Goobta nadiifinta Alaabaadka Cuntada Dawn oo ku taala 6901 Fox Avenue South in Seattle WA. Bridge Point Seattle 130 LLC ayaa dhawaan waxay ka iibsadeen meel ah ilaa 5.4-eeekar oo aaga ku dhaw xaafada Seattle's Georgetown ee 2021. Meeshan waxay ku taalaa meesha la habeeyay ee Lower Duwamish Waterway (LDW) Superfund Site.

Cadaymaha taariikhda hore waxay muujinayaan in hantida la isticmaalayay ilaa ugu yaraan 1917 oo ay ku jireen shirkado iyo warshado kala duwan oo ay ku jiraan dhismaha maraakiibta, faybarka birka ah ee xaashida ah iyo

warshad jeneretoro ah, warshad samayn jirtay heerkulbeega laydhka ah, warshad samaysa raanjiga la buufiyo, istoodh guud iyo xafiidyo. Dhismaha markabku waxa uu guud ahaan ku shaqayn jiray qaybta koonfur galbeed ee meesha. Qiyaastii ilaa todoba dhisme ayaa meesha ka dumiyay oo waxaa lagu bedeley hangarka 1977. Dhismaha jira waxaa weeye qiyaastii 128,800 oo isku wareeg fuudh (2.96 eekar), oo waxaa la dhigaa cuntada qalalan iyo saliida cuntada. Hangarka waxaa isticmaali jiray dhawr shirkadood oo cuntada ah tobanaan sano.

## Xumaanshaha Cuntada

Baadhitaan la sameeyay 2021 ayaa lagu ogaaday inay jiraan wasakh ciida iyo biyaha dhulka ee meesha:


- Bir
- Wadarta haydorookaarboonka batroolka (TPH) ee gaasta
- Carcinogenic Polycyclic Aromatic Hydrocarbons (cPAHs)
- Halogenated milma



Aerial view of Dawn Food Products Parcel

## Maxay tani muhiim u tahay

Goobta Dawn Food Products waxaa lagu xidhiidhiyay [Lower Duwamish Waterway](#)<sup>1</sup> Superfund Site, oo waxay isla noqonayaan 5 mayl oo saaran Duwamish River. Hay'ada Ilaalinta Deegaanka Maraykanka (U.S. Environmental Protection Agency, EPA) waxay ku jirtaa [LDW Superfund Site](#)<sup>2</sup> ilaa Liiska Hantiyaha Qaran ee Superfund ee 2001. Bay'ada waxay ka shaqaynayaan sidii ay u joojin lahaayeen ama u yarayn lahaayeen isha wasada ee LDW Superfund Site, dadaal loo yaqaan "[xakamaynta isha](#)<sup>3</sup>," si markaa EPA ay u qaban karto nidaamka ka nadiifinta wasakhda wabiga.



Muuqaalka Lower Duwamish Waterway

## Waxaa dhacaya ee xiga?


Bay'adu waxay eegtay dhamaan fikirada mudadan ay dadku ka dhiibanayaan fikirka oo waxay sameeyeen wixii isbedel ah ee Amarka Lagu Heshiiyay ama Qorshaha Ka Qayb Galka Shacabka. Hadii waraaquhu u baahan yihiin wax ka bedel wayn, waxa aanu qaban doonaa mudo kale oo fikir ka dhiibashada dadka ah.

Hadii wax isbedel ah oo wayn aan la arko, Bay'adu waxay soo gabo gabayn doontaa waraaqaha oo PLP waxay samayn doontaa Baadhitaanka Xalka, Daraasada Muuqaalnimada, iyo abuurista Qaybo Qoraalka Qorshe Hawleedka Nadiifinta si ay shacabku u akhriyaan.

Talaabo kasta oo kamid ah kuwan waxay u baahan yihiin mudo faalo oo shacab. Muuqaalku waxa uu muujinayaa heerarkan kala duwan ee nadiifinta. Mararka qaar dhawr marxaladood ayaa ka dhaca hal mudo oo fikir ka dhiibasho shacabka ah.

## Nidaamka nadiifinta Bay'ada

Qaabka Sharciga Xakamaynta Wasakhda ([MTCA](#)<sup>4</sup>) waxaa weeye sharciga nadiifinta deegaanka ee Washington. Waxay bixisaa shuruudaha nadiifinta goobta wasakhda ah iyo in la sameeyo heerarka ilaalinta caafimaadka shacabka iyo bay'ada. Bay'ada ayaa dhaqan gelisa [nidaamka nadiifinta MTCA](#)<sup>5</sup> oo kormeertana nadiifinta.



Nidaamka nadiifinta rasmiga ah ee Washington ([lasoo deg qoraalka sharaxaya](#)<sup>6</sup>)

<sup>1</sup> <https://ecology.wa.gov/Spills-Cleanup/Contamination-cleanup/Cleanup-sites/Lower-Duwamish-Waterway>

<sup>2</sup> <https://cumulis.epa.gov/supercpad/cursites/csinfo.cfm?id=1002020>

<sup>3</sup> <https://ecology.wa.gov/Spills-Cleanup/Contamination-cleanup/Cleanup-sites/Lower-Duwamish-Waterway/Source-control>

<sup>4</sup> <https://ecology.wa.gov/mtca>

<sup>5</sup> <https://ecology.wa.gov/Spills-Cleanup/Contamination-cleanup/Cleanup-process>

<sup>6</sup> <https://apps.ecology.wa.gov/publications/SummaryPages/1909166.html>



Toxics Cleanup Program  
PO Box 330316  
Shoreline, WA 98133-9716

## Goobta Nadiifinta Alaabaadka Cuntada Dawn

Waraquhu waxay diyaar u yihiin inay shacabku akhriyaan oo ay ka faaloodaan

Información en Español incluida (página 4)

有關的信息, 已被翻譯成中文 (第4頁)

Có thông tin bằng tiếng Việt (Trang 4)

ព័ត៌មានជាភាសាខ្មែររួមបញ្ចូល (ទំព័រ 4)

Macluumaad af Soomaali ah ayaa la socda (Boga 4)

በአማርኛ የተጻፈ መረጃ ተካትቷል (ገጽ 4)

### Mudada Ka Dhiibashada Fikirka Shacabka

Maay 22 – Julaay 5, 2023

[www.bit.ly/Ecology-DawnFoodProducts-Comments](http://www.bit.ly/Ecology-DawnFoodProducts-Comments)

### Munaasabada Shacabka – Eeg Boga 1 wixii

macluumaad ah

Arbaco, Maay 31, 2023

Guri Furan 5:30 galabnimo; Foolka-fool & Onleyn Bandhiga

ah: 6:30 galabnimo.

[www.bit.ly/Ecology-DawnFoodProducts](http://www.bit.ly/Ecology-DawnFoodProducts)

### Agabka ADA

Si aad u dalbato qaabilaada ADA, kala xidhiidh Bay'ada taleefanka 425-533-5537 ama iimeelka [LDW@ecy.wa.gov](mailto:LDW@ecy.wa.gov), or visit [ecology.wa.gov/Accessibility](http://ecology.wa.gov/Accessibility). Adeegyada Dadka Laxaadka La' ama TTY la hadal 711 ama 877-833-6341.



Khariirada guud ee Dawn Food Products nadiifinta goobta